

Soo bandhigidda & Qaybaha Mashruuca 2023-2024

Mudane/Marwo Waalid ama Mas'uul –

Ardaydu waxay dooran doonaan mid ka mid ah shan qaybood oo kala duwan oo ah History Day si ay shaqadooda ula wadaagaan:

- **Bandhigga:** sida matxafka oo kale, laakiin ka yar. Sida caadiga ah kartoon saddex geesoodle ah. Waxa ka mid ah 500 oo kalmadaha ardaygu curiyay ah, kalmado uu qof ku hadlay oo taageero leh, iyo sawirro wax lagu muujinayo.
- **Bogga internet-ka:** Soo bandhigid dijitaal ah. Waxa ka mid ah ilaa 1,200 oo kalmadaha ardaygu curiyay ah, oo lagu daray kalmado uu qof ku hadlay oo taageero leh, sawirro wax lagu muujiyo, iyo qaybaha kala duwan ee warbaahinta.
- **waraaqda:** qormada qoran. Waxa ka mid ah 1,500-2,500 oo ah wadarta kalmadaha. Galin shaqsi ahaaneed oo kaliyaata. Lama ogola waraaqo koox ah National History Day.
- **Waxqabadka:** Toban daqiiqo oo riwaayad, soo bandhigid hadda la samaynayo ah. Waxa ka mid ah jilayaal, qoraalka qoran, iyo qalabka wax lagu matalo.
- **dukumentariga:** Toban daqiiqo oo ah soo bandhigidda warbaahinta. Waxa ka mid ah sawirro, fiidiyowyo, sawirro wax lagu muujinayo, waraysiyo, nashiidooyin iyo sheekada ardaygu curiyay.

Ardaydu waa in ay ka fikiraan mawduucoda iyo awooddooda shaqsi ahaaneed ka hor inta aanay dooran dabaqad.

- **Mawduuca:** Marmarka qaar mawduucyadu waxay si fiican uga shaqeeyaan qaybo gaar ah. Tusaale ahaan, mawduuc dhacay taariikhdiisii qadiimiga ahayd waxa laga yaabaa in aanu lahayn sawirro wax lagu muujiyo oo ku filan oo loogu talo galay dukumentu.
- **Awoodda:** Fahmida awooddaha shakhsi ahaaneed ayaa sidoo kale ka caawin doonta ardayga inuu xulsho dabaqad. Tusaale ahaan: dukumentariyada ama bogga internet-ku waxay u fiican yihiin ardayda xiiseeya tiknoolojiyadda.

Ma jirto qaacido sibir ah oo loo isticmaalo mashruuca History Day. Mashruuca fiicani waxaa uu yeelan doonaa cilmi baadhis tayo aad u saraysa oo ka dambaysa. Mashruuca fiicani waxaa uu noqon doonaa mid si fudud lagu fahmo. Waxaad mashaariic muunad ah ka fiirin kartaa mnhs.org/historyday/categories/sample-projects.

Doorka waalidka /Mas'uulka ilmaha

Dhisidda mashruuca waxay noqon kartaa xad-dhaaf. Tani waxay noqon kartaa mashruucii ugu waynaa ee uu arday sameeyay waligii. Sidee ayaad u caawin kartaa?

- Ka caawi **maaraynta wakhtiyada kama dambaysta ah ee mashruuca**. Maalinta Taariikhdu ma aha mashruuc uu ardaygaagu maalin kaliyaata ku dhamayn doono.
- Qabo waxyaabaha **khatarta ku ah** in ilmahaagu kaligood ay qabtaan. Tusaale ahaan: waalidiintu waxay qaban karan qalabada laydhka ku shaqeenaya.
- Sii **talo farsameed** marka aad karayso. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in aanay ardaydu garanayn sida ay dib u qaabayn ugu samayn lahaayeen sawirada ama sida ay u kaydin lahaayeen faylasha bogga internet-ka.

Miyaanu u baahannahay inaanu lacag badan ku qarash-garayno?

National History Day waxay ku saabsan tahay taariikhda. Waxaanu doonaynaa in aanu aragno ardayda isticmaalaysa mashruucoda si ay u sharraxaan una caddeeyaan fikradahooda.

Uma baahnid in aad lacag badan ku qarash-garayso si aad tan u samayso! Tifatiraha bogga internet-ka ee NHD –gu waa mid bilaash ah. Kasoo amaanayso waxyaabaha wax lagu matalo asxaabta ama iskuulka si aad ugu samayso waxqabadka. Waxa jiri kara barnaamijyo dukumentariyo ah oo ku jira compyuuutarkaaga guriga ama dugsiaga. Kartoonka wax lagu soo bandhigaa waa.

Waad ku mahadsantahay taageerada aad taageerayso ardaygaaga marka ay curinayaan mashruuc History Day ah! Waxaad History Day wax badan ka baran kartaa bogga internet-ka, www.mnhs.org/historyday.

Sammi Jo Papas

Sammi Jo Papas
Maamulaha Barnaamijka iyo Isuduwaha dawlad goboleedka
National History Day in Minnesota
samantha.papas@mnhs.org